Disability Rights OHIO

# XAASHIDA 4-AAD EE TALLOOYINKA U-DOODISTA

SIDEEN KU OGAAN KARAA IN ILMAHAYGU HELAYO FAPE IYO IN KALE?

## I. TALLAABADA KOOWAAD: FAHAM HEERKA/MIQYAASKA FAPE

Waxbarashada guud ee habboon ee bilaashka ah (free appropriate public education, FAPE) macnaheedu waa waxbarasho: si gaar ah loogu talagalay ilmahaaga, looguna talagalay inay buuxiso baahiyada qaaska ah ee ilmahaaga, ilmaha marin u siisa manhajka guud, buuxisa miqyaasyada heerka fasalka ee Ohio, oo faa'iido waxbarasho siisa ilmahaaga.

**Talo:** FAPE macnaheedu maaha in ilmahaagu xaq u leeyahay waxbarashada suurtagal ahaan ugu fiican ama waxbarasho inta ugu badan sare u qaadaysa kartida ilmahaaga.

Ilmahaagu wuxuu xaq u leeyahay waxbarasho si macquul ah loo xisaabiyay si loo siiyo faa'iido waxbarasho marka la eego awoodaha ilmahaaga.

## II. TALLAABADA LABAAD: FAHAM IEP-GA ILMAHAAGA

Dugsigaaga waxaa looga baahan yahay inuu bixiyo waxa ku jira IEP-ga.  Waa muhiim inaad xaqiijiso in IEP-ga si cad loo qoray si aad u fahanto waxa la bixinayo.

**Talo:** Qof dib u-eegis ha ku sameeyo IEP-ga ilmahaaga.  Macallin/bare, u doodaha waxbarashada qaaska ah, ama xirfadle waxbarasho ama mid caafimaad ayaa dib u eegi kara IEP-ga ilmahaaga oo ku siin kara jawaab celin ku saabsan sida uu IEP-gu u cad yahay.  Waxa laga yaabaa inay ku siiyaan talooyin ku saabsan sida loo wanaajin karo IEP-ga.

## III. TALLAABADA SADDEXAAD: DIB U EEG XOGTA KU SAABSAN HORUMARKA

Dugsigaagu waa inuu ururiyaa macluumaad iyo xog ku saabsan horumarka ilmahaaga marka la eego yoolalka IEP-ga iyo adeegyada la xidhiidha.  Eeg IEP-ga si aad u xaqiijiso inuu diiwaangelinayo xog ururinta.  Ka codso dugsiga inuu ku siiyo warbixinnada horumarka iyo xogaha kale.  Dib u eeg xogta si aad u go'aamiso horumarka ilmahaaga.

**Talo:** Haddii dugsigaagu aanu hayn xog uu ku tusi kara, codso kulan IEP ah oo looga hadlayo horumarka.  Dabagal ku samee xog la'aanta oo xaqiiji in IEP-ga uu si cad u diiwaangelinayo nooca xogta la ururin doono iyo qofka mas'uulka ka ah.

## IV. TALLAABADA AFRAAD: CODSO KULAN IEP AH OO LOOGA HADLAYO HORUMAR LA'AANTA

Haddii aysan jirin xog lagu sameyn karo dib u-eegis, ama haddii xogtu ay muujineyso horumar la'aan, codso kulan IEP ah.  Marka kulanka lagu jira, waxaad ka hadli kartaa xog la'aanta, ama waxaad wax ka beddeli kartaa IEP-ga si aad wax uga qabato horumar la'aanta.  IEP-ga ayaa wax laga beddeli karaa si loogu daro adeegyo dheeri ah, isbeddel ku aadan habka wax-baridda, ama ku-daridda shaqaale iyadoo lagu saleynayo baahiyada ilmahaaga.